IIB MA GALO

# FAAFINTÁ RÁSMIGA AH

# الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 12aad Muqdisho 1da Juunyo 1984 L. 6

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## K O O B N I I N

QAYBTA KOOWAAD
SHARCI

SHARCI L. 20 ee 9 Maajo 1984, Oggolaansho Meel marin Heshiis dhex maray J.D.S. iyo Bankiga horumarinta Afrika BOG. 385

QAYBTA LABAAD
XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 20 ee 9 Maajo 1984, Meel marin heshiis amaaheed oo dhex maray J.D.S. iyo Bankiga Horumarinta Afrika. »

DECREE N. 20 on 9 May 1984. Instrument of ratification

XEER-SHARCI lambar 4, taariikh 18 Mag. 1984:
Dib u habeynta Sharci lambar 4 ee 13ka Abriil 1983, kuna saabsan joojinta qaadka.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 4 ee 14ka Abriile kuna saabsan joojinta qaadka iyo beddelaadyadii ka dambeeyey;

MARKUU TIXGELIYEY: Duruufaha iyo waayahalala kulmay muddadii ka soo wareegtay dhaqan galka Sharciga joojinta qaadka;

MARKUU OGAADAY: In soo gelinta qaadka Dalka JDS iyo ganacsigiisa loo adeegsado tabo cusub oo abaabul qalab, hanti iyo dadba leh, ujeeddadoodu na tahay in la wiiqiyo himilada Ummadda iyo Dawladda Soomaaliyeed ee ka badbaadinta Bulshada dhibaatooyinka dhaqan, dhaqaale, akhlaaq iyo guud ahaan bulshadeed ee qaadku leeyahay;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in dib loogu laabto Sharciga joojinta qaadka, loona habeeyo qaab looga gudbi karo xakabyada ka soo baxay Sharcigii hore, isla markaasna looga hortegi karo xeeladaha iyo tabaha cusub ee la adeegsado;

MARKUU TIXGELIYEY: Dabeecadda degdegga ah ee dib u habeyntani leedahay, sidaas darteedna ay lagama maarmaan noqotay in lagu soo saaro Xeer-Sharci;

MARKUU DHEGEYSTAY: Golaha Wasiirrada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer-Sharci ee soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa dib u habeyn lagu sameeyey Sharci lambar 4, soona baxay 13kii Abriijle 1983, kuna saabsan joojin-

ta qaadka, waxaana loo beddelay sida ku tilmaaman qodobbada soo socda:-

Qod. 2aad

Waxaa la xaaraantimeeyey in Dalka JDS qaad la ga soo geliyo, Dalka gudihiisa lagu beero, lagu haysto ama lagu cuno.

Qod. 3aad

Qof kasta oo qaad Dalka dibedda ka soo geliya, ama gacan ka geysta soo gelintiisa, ama ka ganacsada ama dullaal ka noqda ganacsigiisa, waxaa lagu ciqaa bayaa:

— 3 ilaa 15 sano oo xarig ah iyo ganaax u dhexee ya 50.000 ilaa 100.000 shilin Soomaali;
— 10 ilaa 20 sano oo xarig ah iyo ganaax u dhexee ya 100.000 ilaa 200.000 shilin Soomaali, haddii qofku dembiga noocaas ahi horey u galay.

Qod. 4aad

1. Gaadiidka loo isticmaalay soo gelinta qaadka Dalka JDS, ama lagu helo Dalka gudihiisa isagoo sida qaad, waa lala wareegayaa, qaadkana waa la gubayaa.

2. La wareegidda gaadiidka waxaa shardi u ah in Milkiilaha ama qofka uga wakiilka ah gaadiidka uu ula kac ugu soo qaaday qaadka

Qod. 5aad

1. Qof kasta oo guriga uu deggan yahay ama ma suulka ka yahay laga helo qaad ama lagu cuno waxaa lagu ciqaabayaa ganaax u dhexeeya 10.000 ilaa 50.000 shilin Soomaali, haddii ay caddaato inuu ogaa qaad kaas, raallina ka noqday.

2. Qofka guriga deggan waxaa loola jeedaa qofka masuulka ka ah guriga markii dembigu dhacayey, og golaadayna in qaad lagu haysto ama lagu cuno, wuxuu na noqon karaa milkiilaha guriga, kireystaha, ama qof kasta oo si kasta masuul uga ah guriga.

3. Guriga waxaa loola jeedaa hoyga hurdada, mee laha ganacsiga ama meel kasta oo qof ama dad u gaar ah.

Qod. 6aad

1. Waxaa reebban in qaad Dalka gudihiisa lagu beero.

2. Qof kasta oo qaad ku beera Dalka gudihiisa ama kuwii horey ugu beernaa baabi'in waaya, waxaa lagu ciqaabayaa 3 ilaa 15 sano oo xarig ah iyo ganaax u dhexeeya 50.000 ilaa 100.000 shilin Soomaali, iyo qaad ka oo la gubo.

Qod. 7aad

Marka laga reebo xaaladaha ku tilmaaman Qod. 3aad ee Sharcigan, qof kasta oo lagu helo isagoo hays ta ama cunaya qaad, waxaa lagu ciqaabayaa:

— Hal ilaa 5 sano oo xarig ah iyo ganaax u dhexee ya 10.000 ilaa 50.000 shilin Soomaali;

— 3 ilaa 10 sano oo xarig ah iyo ganaax u dhexee ya 30.000 ilaa 100.000, haddii dembiiluhu yahay qof horey loogu xukumay dembi noocaas ah.

Qod. 8aad

Qofka xabsi lagu xukumo dembi qaad dartiis, had dii xukunku yahay kii ugu horreeyey, wuxuu ciqaabta xarigga ah ku beddelan karaa mid lacageed, iyadoo maalintiiba loo xisaabinayo 100 (boqol) shilin Soo maali.

Qod. 9aad

Qofka u xilsaaran ilaalinta iyo dhaqangelinta Shar cigan ee suuragal ka dhiga am afududeeya ama ku kaca fal ah in qaad la soo geliyo Dalka, laga ganacsa do, lagu beero, lagu haysto, lagu cuno ama si kastaba u gaba xilka ka saaran qabashada fal dembiyeedya daas, wuxuu muteysanayaa ciqaabta uu dhigayo qo dobka ku saabsan fal dembiyeedka uu qaban waayey.

Qod· 10aad

Xukunka ku dhaca, dembi qaad dartiis, Shaqaala ha Qaranka ee Reyidka ah iyo kuwa Ciidammada Qa labka Sida, wuxuu xukunsanaha u keenayaa:

— Xiriirka shaqo oo xaq la'aan go'a;

— Xuquuqda hawlgabka iyo liiltirka oo ka lunta·

Qod·11 aad

1· Lacagaha ka soo xerooda ganaaxyada iyo xabsi beddeleshada, boqolkiiba soddon (30%) waxaa loo bixi nayaa abaalgud, waxaana loo qaybinayaa sida soo so cota:

| | | |
|---|---|---|
| — | Soo sheegayaasha | 10%; |
| — | Soo qabtayaasha | 7%; |
| — | Baarayaasha | 3%; |
| — | Shaqaalaha Maxkamadda dacwadda qaaday | 5%; |
| — | Sanduuqa Horumarinta Degmada | 5%; |

2· Soo sheegayaasha dembiga waa in qaybtiisa loo hormariyaa, lana siiyaa marka dembiilaha xukunku ku dhaco· Hormariska waxaa bixineysa Wasaaradda Maaliyadda·

3· Kooxaha kale, qaybaha ku soo aada waxay ka qaadanayaan lacagta soo xeroot·

4· Haddii soo-sheege uusan jirin, soo qabtaha ama soo qabtayaasha waxay yeelanayaan boqolkiiba (10%)·

Qod· 12aad

1· La dagaallanka iyo dabar goynta qaadka waa waajib saaran Dawladda iyo Dadweynaha Soomaali yeed·

2· Qaranku magdhow ka bixin maayo dhibaatada iyo khasaaraha la soo gudboonaada qofka isku daya ama is hortaaga Ciidan gudanaya waajibaadkiisa shar ciga ah ee ka hortagga iyo gacan ku dhigidda dambi yada qaadka·

Qod· 13aad

Qaadista dacwadaha la xiriira dembiyada Sharci gan ku tilmaaman waxaa awood u leh Maxkamadda·

Badbaadada Dalka iyo Laamaha Maxkamadda Badbaa dada ee Gobolka.

Qod. 14aad

Waxaa la burriyey sharci kasta oo ka soo horjee da ama aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 15aad

Xeerkan sharci wuxuu dhaqan gelayaa isla maalin ta uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah JDS, isla markaana waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacbiga si loogu rogo Sharci.

Muqdisho, 18 Mag. 1984

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

XETR-SHARCI Lam. 5 ee 18 Mag. 1984, Dembiyada Mukhaadaraadka:

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka;

MARKUU TIXGELIYEY: Baahida loo qabo in la ad keeyo ciqaabta u dhigan dembiyada mukhaada raadka;

MARKUU GAROWSADAY: Baahida loo qabo in la dabargooyo waxyaalaha maskaxda dooriya oo ad duunweynuhu u guntaday la dagaallankooda, waa jibna ay tahay in JDS ay qaaddo tallaabo kasta oo lagu xaqiijinayo dabargoyntooda;

MARKUU DHEGAYSTAY: Golah aWasiirrada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer-Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Xaaladaha Sharcigu bannaynayo marka laga reebo. qof kasta oo sameeya, soo saara ama soo geliya dalka JDS, ama ka ganacsada, ama siiya (somministra) ama u keena qof kale waxyaabaha maskaxda doo riya (mukhaadaraad), waxa lagu ciqaabayaa 10 sano oo xarig ah iyo So.Shs. 50.000/= oo ganaax ah.

2. Ciqaabta waa la kordhinayaa haddii waxyaaba ha kor ku tilmaaman ee maskaxda dooriya laga iibiyo ama gacanta loo geliyo qof da'diisu ka yar tahay 18 sa no, ama xagga maskaxda wax u dhiman yihiin ama qof ka mid ah dadka mukhaadaraadka isticmaalkiisa caadaystay.

Qod. 2aad

1. Qof kasta ee oggolaada isagoon ka qayb gelin fa lalka ku tilmaaman qodobka hore, in meel caam ah ama khaas ah ay ku kumaan dad ujeeddadoodu tahay in waxyaabaha maskaxda dooriya ay ku cunaan ama ku isticmaalaan, waxaa lagu ciqaabaaa 5 sano oo xarig

2. Qof kasta oo gala meelaha ku tilmaaman faqrad da hore ee qodobkan, si uu waxyaabaha maskaxda dooriya u isticmaalo, waxaa lagu ciqaabayaa 3 sano oo xarig ah iyo So.Shs. 20.000/= oo ganaax ah.

Qod. 3aad

Qaadista dacwadaha ciqaabta ee mukhaadaraadka waxaa lagu wareejiyey awoodda Maxkamadda Bad baadada Dalka iyo Laamaha Maxkamadda Badbaadada ee Gobollada.

Qod. 4aad

Dacwadaha hor yaalla Maxkamadaha caadiga ah ee aan weli la qaadin iyo kuwa u rahman go'aanka, waxaa lagu soo wareejinayaa Maxkamadda Badbaada da ee deegaan ahaan awoodda u leh.

Qod. 5aad

Xukunsanayaasha dembiyada mukhaadaraadka ee rafcaanlayaasha ah waxay xaq u leeyihiin inay ka tanaasulaan rafcaankooda, haddii aan dacwaddooda xukun ama go'aan loo rahmin, waxayna dhammaysa nayaan ciqaabtii horey loogu xukumay.

Qod. 6aad

Dhanka ciqaabta, eedaysanayaasha u xiran ama loo haysto dembi ka mid ah dembiyada mukhaadaraad ka dhaqan galka Xeer-sharcigan ka hor, waxaa loo raa cayaa ciqaabaha ku tilmaaman Xeerka ciqaabta iyo shuruucda kale ee horey u jirtay.

Qod. 7aad

Xeer-sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalin ta uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana loo gudbi nayaa Golaha Shacbiga Qaranka si Sharci loogu rago.

Muqdisho, 18 Mag. 1984

MADAXWEYNAHA JDS
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)